JAMHUURIYADDA SOMALILAND REPUBLIC OF SOMALILAND

# MAXKAMADDA GOBOLKA M-JEEX /REGIONAL COURT M-JEEX

## XAFIISKA GARSOORAHA

15/07/2023

**MGH/DFL/393/2021**

Ku: - Taliyaha Saldhiga Booliska C/Iiidaan =Hargaysa=
Ku: - Taliyaha Qaybta Galbeedka Booliska =Hargaysa=
Ku: - Duqa Caasimada Hargaysa =Hargaysa=
Ku: - Guddomiya Degmada 31 May =Hargaysa=
Og: - Taliyaha Ciidanka Booliska JSL =Hargeysa=
Og: - Xoghayaha Fulinta Dawlada Hoose... =Hargaysa=
Og: - Wasaarada Arrimaha Gudaha JSL =Hargeysa=
Og: -Kaaliyaha Fulinta Maxkamada Gobolka M/Jeex =Hargeysa=
Loo Fuliye: - C/risaaq Cali Xasan
Qareen: - Farduus Aadan Maxamed =Hargaysa=
Lagu-Fuliyayaal: -Khadar Cabdi khayre =Hargaysa=
Aadan C/laahi jaamac

Jamhuuriyadda Somaliland Maxkamadda Gobolka M-jeex-Hargeysa Republic of Somaliland The Regional Court Of M-jeeh Hargeisa

**Ujeedo: - Amar U Madax- Banaaneyn Dhulka Cabirkiisu Yahay 48x90MT iyo Dhulka kale ee cabirkiisu yahay 48x45MT jihooyinkiisuna Kala Yihiin: - waqooyi=Dhisme Bari=waddo Koonfur=waddo,Galbeed=Dhisme, kuna yaala degmada 31 May**

**Maxkamada Gobolka M/jeex Hargeysa:**

**Markey Aragtey:-** Gal_Dacwadeedka Fulinta Ah Ee Sumadiisa Tahay MGH/DFL/393/2021, Ee Dhinacyadiisuna Sare Ku Xusan Yihiin.

**Markay Aragtey: -** Arjiga Codsiga Xoog Fulineed ah Ee Ku Taariikhaysan 12/02/2023 Islamarkaana Soo Galay Maxkamada 13/02/2023 Ee Uu Maxkamada U Soo Gudbiyay Qareenka Loo-fuliyaha

**Markay Aragtay:** Heshiiska Nootaayada Sumadeedu tahay Ref:766/AEH/2012 kuna taariikhaysan 9/03/2012 kuna saabsan kala iibsi dhul.

**Markay Aragtay:** Digniinta Sumadeed tahay **MGH/DFL/393/2021** kuna taariikhaysan 11/07/2022.nuxurkeeduna yahay

28/04/2024



To: Abdalle / M.Diiya Engahi
Dhulka, Tasi Dhisye
Cabirka ...
Kala ...
...

maxkamadu waxay ku amraysaa lagu-fuliyaasha khaddar cabdi khayre iyo Aadan C/laahi Jaamac in muddo 10 cisho gudahood ah ku wareejisaan dhulka cabirkiisu yahay **48x90 iyo 48x45 mt** jihooyinkiisuna Kala Yihiin: - waqooyi=Dhisme Bari=waddo Koonfur=waddo,Galbeed=Dhisme, kuna yaala degmada 31 May.

**Markay Aragtay :** Qaraarka Maxkamada Gobolka M/Jeex ee sumadiisu tahay **MGH/DFL/393/2021** kuna taariikhaysan **22/08/2022.**

**Markay Aragtay:** Amarka Dib U Celinta iyo Dhamaystirka ee Maxkamada Rafcaanka Gobolka M/Jeex ee sumadiisu tahay **MRGMJ/QMRL/359/2022** kuna taariikhaysan **12/09/2022.**

**Markay Aragtay:** Amarka Xooga Fulinta ee sumadiisu tahay MGH/DFL/393/2021 ee ku taariikhaysan 15/02/2023 oo ay Maxkamada gobalku fulisay lagana raray jiingad iyo reero degana sida ay booliska iyo kaaliyaha fuliyuhu shegeen in ay fulintaasi si nabada ku dhamaatay wax dhibaato ahina ayna ka dhicin

**Markay Aragtay:** Dhamaan Xukunada Maxkamaddaha Ee Sare Ku Xusan Iyo **Qodobada:- 272,338,342 XHM.** Sidaas Daraadeed Waxay Soo Saartay Qaraarkan Hoos Ku Qoran.

## QARAARKA MAXKAMADDA

1) Maxkamadu Waxay U Madax Bannaanaysay Loo-Fuliye: C/risaaq Cali Xasan Dhulka Cabirkiisu Yahay **48x90MT Iyo 48x45MT jihooyinkiisuna Kala Yihiin: - waqooyi=Dhisme Bari=waddo Koonfur=waddo,Galbeed=Dhisme, kuna yaala degmada 31 May**
2) Sidaasi Darteed Waxa Lagu Amrayaa Taliyaha Saldhiga Booliska C/Iidaan iyo Guddoomiyaha Degmada 31 May In uu Loo-fuliyaha Sare Ku xusan u Madax Banaan yahay Dhulkaasi Cabirkiisa Iyo Jihooyinkiisuba Sare Ku Xusan Yihiin, Loo-Fuliyaha Magaciisu Sare Ku Xusan Yahay Laga Bilaabo Maanta Oo Ay Taariikhdu Tahay **15/07/2023**, Inay Sifo Kasta Oo Sharciga Waafaqsan U Isticmaali Karo Uguna Tasarufikaro Dhulkaasi Isla Markaana Cidii Ka Hor Timada Amarkan La Horkeeno Sharciga.

3) Waxaa kale oo lagu Amrayaa Maayarka Caasimadda Hargaysa in Dhamaan wixii faylaL hore uga soo baxay dhulka sare ku xusan aad baabiisaan/Tiritirtaana Maadaama loo fuliyay Dhulkan Sare ku xusan Loo fuliyaha C/risaaq Cali Xasan una samaysaan Sharcigii Dhulkan Cabirkiisu Yahay 48x90MT Iyo 48x45MT jihooyinkiisuna Kala Yihiin: - waqooyi=Dhisme Bari=waddo Koonfur=waddo,Galbeed=Dhisme, kuna yaala degmada 31 May .

4) Wuxuu Soo Baxay Qaraarkan Madax-Banaanaynta Ahi Maanta Oo Taarikhdu Tahay 15/07/2023.

**Mahad Maxamed Yuusuf________**

**Garsooraha Maxkamada Gobolka M/Jeex Hargeysa**

Jamhuuriyadda Somaliland
Maxkamadda Gobolka M-jeex-Hargeysa
The Republic of Somaliland
The Regional Court Of M-jeeh Hargeisa

**Khadar Saleebaan Xandule________**

**Kaaliyaha Maxkamada Gobolka M/jeex**

**Jamhuuriyada Somaliland**
**Dawladda Hoose Ee Hargeisa**
**Aggaasimaha Dhulka D/Hoose Hargeisa**

Ref/DH/GHDDH/_604/2024.

**Ku: Duqa Caasimada Jsl** — Date:-13/07/2024 — =Hargeysa=
**Og: Xoghayaha Fulinta D.H.H** — =Hargeysa=
**Og: K/X/Duqa Caasimada Jsl** — =Hargeysa=

## Ujeedo: kaso warbixin dhul

Mudane mayor

Anigo amarka qalinka ah ee ku tariikhaysan **02/08/2023** kaso ah ka soo warbixin warqada maxkamasa ee sumadeedu tahay **JGH/DFL/393/2021** kuna tariiikhaysan **15/07/2023** taso nuxurkeeduna uu yahay amar madax bananayn dhul, dhulkan oo ku yala **degmada 31 may.**

Hadaba mudane mayor tixraca labada geomitir ee kala ah **Eng:Maxamed Maxamud Cabdi (Cabdale)** iyo **Eng:Maxamed Diiriye Samatar,** dhulkan oo cabbirkiisu yahay **90mx48m** iyo **48x45m** marki anu taganay soon a hubinay goobtan faylasha ka baxay dhulkan waxa noo cadatay in **90x48m** uu madax bananyahay balse **48x45m** ka kale waxa ka baxay file **TR-34613** kuna qoranayahay **SOM ALUMUNUUM** oo leh nootayo original ah oo kaga iibsaday **Kayse Xasan Ismaciil** lehna file **-no=36901** cabirkiisuna dhanyahay **90x48m** kaso loo madax bananaynayo C/risaaq Cali Xasan **48x45m** ka mida ah block-gaasi leh **TR-34613.**

Sidaas darteed mudane mayor waxan soo jedinaya in file-ka leh **TR-34613** laga tirtiro cabir dhan **48x45m**,file-kaa baxay iyo mulkiyadana ay soo xarayso maxkamadu.

**Signature**

**Eng. Ahmed abdi omer**
**Kus.Aggasimha Waaxda Dhulka**

Email: azpqr777@gmail.com
Tell: +252-636314437

Ku: Ag. Dhulka
1. Jaceed soo Process
gareysaa sidii loo
tirtirani lahaa Tr- ...

12/08/2024